



# Xuquuqda & Waajibaadka Bukaanka

## XUQUUQDAADA

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah qodobadan, fadlan weydiiSO bixiyahaaga ama xubin kasta oo ka mid ah shaqaalaha OFFOR.

### **Ka ahan maacaamilka daryeelka caafimaadka, waxaad xaq u leedahay:**

**Doorashada Bixiyeyaasha Adeegga** – Ka dooro ama iska beddel bixiyahaaga caafimaad ee ka mid ah xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee aqoonta leh ee ah shaqaalaha SmileMD. Xaqa aad u leedahay in aad iska bedesho bixiyayaasha haddi bixiyayaasha kale la heli karo.

**Tixgelinta iyo Helida Daryeelka Ixtiraamka leh** – In sharaftaada shaqsi la ixtiraamo iyadoon loo eegayn da'da, aqoonsiga lab iyo dhedig, isir, qoqmiyada, asalka qaran, dhaqan, nooca galmoodka, fasalka nololeed, kartida jireed, macluumaadka hidaha, jeegada aad ku dhex leedahay gudaha bulshada, qaab nololeedka ama sifaadka kale ee shakhsi ahaaneed.

**Go'aan Qaadashada** – Waxaad xaq u leedahay inaad ka qayb qaadato go'aan qaadashadaada caafimaad. Ururku wuxuu ixtiraamayaa xuquuqahan, si kastaba ha ahaatee: Waa siyaasadeena, haddii ay dhacdo inay xumaato, shaqaalahaheenu waxay had iyo jeer isku dayi doonaan inay dib u soo nooleeyaan oo ay kuu gudbiyaan isbitaalka kuugu dhow/leh heer sare oo daryeelka si aad u hesho qiimayn dheeraad ah. Isbitaalka/heerka sare ee daryeelka si loo go'aamiyo daawaynta dheeraadka ah ama ka noqoshada tillaabooyinka daawaynta ee horeba u bilaabmay waxa lagu amri karaa si waafaqsan rabitaankaaga, Hagitaanadii Hore, ama Awooda Qareenka ee Daryeelka Caafimaadka. Heshiiska aad la gashay siyaasaddan ma burinayso ama burinayso Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka ee hadda jira ama Awoodda Daryeelka Caafimaadka ee Qareenka." Haddii AADAN ku raacsanayn siyaasaddan, shaqaalaha ayaa kaa caawin doona inaad dib ugu jadwaleysato habraaca xarun kale.

**Macluumaadka Caafimaadka** – Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaadka ku saabsan ogaanshahaaga, qiimayntaada, daaweyntaada, iyo sheegida waxa sababay cudurka.

**Qarsoodinimada iyo Asturnaanta** – Filo daawayn qarsoodi ah dhammaan wada xidhiidhada iyo diiwaannada adiga kugu saabsan. Marka laga reebo sida sharcigu dhigayo, oggolaanshahaaga qoran waa in la helaa ka hor inta aan macluumaadka la siin qof kasta oo aan si toos ah xiriir ula lahayn daryeelkaaga. Kahor intaadan oggolaan siideynta macluumaadka, waxaad ka hadli kartaa macluumaadka la sii deyn doono. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul qoraal ah ama elektaroonig ah "Ogaysiis Hab-dhaqannada Qarsoonnimada" oo sharxayaa sida macluumaadkaaga caafimaad ee ilaashan loo isticmaali doono loona shaacin doono.

**Adeegga Turjubaanka** – Codso adeegyada turjumaanka haddii aad u baahato, si lacag la'aan kuugu ah adiga.

**Ogow khidmadahaaga** – Xog ogaal u ahaw khidmadaha kugu soo baxay muddada booqashadaada iyo siyaasadaha lacag-bixinta.

**Adeegga Jawaab-celin leh** – Filo jawaabta wakhtiga ku habboon codsiyada kasta oo macquul ah ee adeegga. Si kastaba ha ahaatee, xaq uma lihid inaad ku adkaysato daawaynta iyo adeegyada aan habboonayn ama caafimaad ahaan aan loo baahnayn.

**Marin u helka Diiwaanada** – U hel macluumaadka ku jira diiwaanada gudaha waqti macquul ah, marka laga reebo xaalado gaar ah oo sharcigu qeexay.

**Cabashooyinka** - Waxaad xaq u leedahay inaad sheegto welwelkaaga ama cabashadaada iyadoona wax aargoosi ah lagula kicin adigoo na soo wacaya ama iimayl noo soo diraa. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah-Xafiiska Barnaamijyada Caddaaladda- Waaxda Caddaaladda ee Mareykanka, 999 N. Capitol Street, NE, Washington, DC 20531.

## MAS'UULIYADAHAAGA

### Ka ahaan macaamilka daryeelka caafimaadka, waxaa ku saaran mas'uuliyadda in aad:

**Su'aalaha si buuxda uga jawaabto** – Inta kartidaada ah, bixi macluumaad sax ah oo dhamaystiran bixiyahaaga daryeelka caafimaadka wixii ku saabsan arin kasta oo ku saabsan caafimaadkaaga, daawo kasta (ay ku jiraan daawooyinka farmashiyaha laga soo iibsado iyo kaabista cuntada) iyo wixii xasaasiyad ama dareen ah ee aad qabto. Haddii aysan caddayn sababta macluumaadka qaarkood u habboon yihiin, fadlan weydii.

**Xaqiiji inaad fahanto** – Xaqiiji baahidaada ku aadan marin u helka iyo fahamka adeegyada laga wada hadlay oo la bixiyo. Weydii bixiyahaaga daryeelka caafimaadka wax kasta oo aan caddayn, sida cudur-ogaanshaha, qorshaha daaweynta, baaritaanka ama siyaasadda. Cudur-ogaanshaha iyo daawaynta inta badan waa kuwo la shakhsi ahaaneeyay. Calaamadahaagu waxa laga yaabaa inay u baahdaan dhakhtarka inuu u kala saaro dhowr cudur oo kala duwan, ama waxaa laga yaabaa inaad isku daydo in ka badan hal qorshe daaweyn si aad u xalliso dhibaataada.

**Gaadiid-raaca** – adiga ayaa mas'uul ka ah inaad ka bixiso kharashka gaadiid-raaca naftaada iyo/ama bukaanka. Si badbaado leh ugu safriso guriga oo aadna la joogto bukaanka sida uu faray bixiyaha ama sida lagu tilmaamay tilmaamaha isbitaal ka bixinta.

**Furfurnaato** – Ka hadal sidaad u aragto booqashadaada - wax kasta oo laga soo bilaabo daaweyntaada ilaa awoodda aad u leedahay inaad bixiso kharashka daaweynta.

**Raacida daawaynta lagu heshiiyey** – Nagala tali haddii aad u malaynayso inaad awooddo oo aad rabto inaad raacdo qorshaha daaweynta ee lagu heshiiyey. Qorshaha ugu waxtarka badan waa kan ay dhammaan ka qaybgalayaashu isku raaceen inuu yahay kan ugu wanaagsan oona si sax ah loo fuliyo. Haddii aad doorato inaad diido ama aadan u hoggaansamin tilmaamaha uu ku siiyay bixiyahaaga daryeelka caafimaadka, waxaad u baahan doontaa inaad aqbasho cawaaqib kastoo ka dhalan karta go'aamadan iyo falalkan.

**Ka soo warbixiso isbedelada imaada** – Noo sheeg wax ku saabsan isbedel kasta oo ku yimaadda caafimaadkaaga ama saameynta xun ee daaweyntaada, ama haddii calaamadahaagu aysan soo roonayn.

**Xushmeysaa bukaanada kale, Shaqaalaha OFFOR, iyo xarunta** – u muuji ixtiraamka xuquuqda iyo hantida bukaanada kale iyo Shaqaalaha OFFOR adigoo raacaya sharafta iyo ixtiraamka aad filayso inaad hesho. Tixgeli xarumaha iyo qalabka. Tan waxaa ka mid ah mas'uuliyadda u hoggaansanaanta siyaasadaha iyo nidaamyada xakameynta caabuqa ee shaqaalaha iyo gudaha xarunta.

**Bixiso Khidmadahaaga** – Bixi khidmadaha ka hor helida adeegga si aad u xaqiijiso in aad fulisay waajibaadkaaga maaliyadeed ee ku aadan daryeelkaaga

**Nala Soo Xidhiidh** – Haddii ay kuu sugaandeen wax arrimo ah, walaac ah, ama cabasho ah oo ku saabsan daaweyntaada ama daryeelkaaga, fadlan nagala soo xiriir ciwaanka iimaylka bukaanka: [patient-communications@smilemdsedation.com](mailto:patient-communications@smilemdsedation.com) ama naga soo wac lanbarka **1 (877) 789-8583**.

## Mahadsanid!